

# Tilmaamaha Barashada Saaxiibka ee Heerarka Waxqabadka ECEAP

Tilmaamahan waxaa loo adeegsan karaa inay weheliyaan Tobobarka Guudmarka Heerarka Waxqabadka Barnaamijka Waxbarashada iyo Kaalmada Caruurnimada Hore (Early Childhood Education and Assistance Program, ECEAP) Isticmaal su'aasha ku hagaysa si aad u u tibaaxdo in dheeraad ah heerarka. Marka aad eegeyso su'aalaha ee aad waydi jawaab, qoro, oo waxa aad kaalmo ula xidhiidhaa qaabka xidhiidhka silsilda qandaraaslahaagu uu doorbido.

## Qaybta IA: Ujeedka iyo Awooda

- Inta aad akhrinayso qaybta kowaad ee heerarka Ujeedka iyo Awooda, ma jiray sharax ama xarfo uruuris ah oo cusubi?
- Akhriska IA-2 (1), muxuu barnaamijkaagu samayn karaa si uu u xaqiijiyo inaad u hogaasanto heerkanta?

## Qaybta CO: Natijada Ilmaha

- Waa maxay mudada buuxinta baadhitaanka korniinka ilmaha ku jira?
- Ma jiraa waxyaabo laga soo reebay mudadaas?
- Goorma ayay ku eeg tahay Qodobada Eegitaanka Kormeerka Khidada Dahabiga ee Barista (Teaching Strategies Gold, TSG)?
- Maxaad u aaminsan tahay inay jirto diirad saarka noocan ah ee heerkanta ee ku xeeran gaar u yeelida ilmo iyo qoys kasta?

## Qaybta FEP: Iskaashiga iyo La Shaqaynta Qoyska (Family Engagement and Partnerships)

- Akhriska FEP-1 Mabaadii'da Iskaashiga iyo La Shaqaynta Qoyska, miyaa wax mabda' ahi kuula muuqdaa inuu kasii muhiimsan yahay kuwa kale? Haddii ay sidaa tahay, waayo?
- Waa goorma taariikhda qiimaynta hore ee La Socodka Dhaqdhaqaaqa, eegitaanka badhtanka sanadka, iyo qiimaynta danbe ay ku eeg tahay Nidaamka Maamulida Waxbarashada Hore (Early Learning Management System, ELMS)?
- Qaybtan waxay bixisaa tusaalayaal badan oo u abuura fursado qoysaska ay kula shaqayn karaan barnaamijkaaga. Sidee adiga ama qandaraaslahaagu aad u hirgelinaysaan qorshaha si loo dhiiri geliyo ka qayb galka xubnaha ee bulshooyinka hore looga sadbursaday ee loo cabudhin jiray?
- Khayraad nooc ee ah oo bulshadaada ah ayaad aad u taqaanaa? Kee ayaad u baahan tahay si aad in dheeraad ah u buuxiso?



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**

Taariikhda Hore: Sebteember 15, 2022

Waaxda Waxbarashada Hore | Waxaa u ansixiyay qaybinta Kerry Beymer, RICAP Lead

## Qaybta PDTR: Hormarka, Tobobarka iyo Shuruudaha Xirfadlaha (Professional Development, Training, and Requirements)

- Imisa maalmood kadib markii lagu shaqaalaysiiyay ayaad gelisay shahaadooyinka waxbarasho ee shaqaalaha Agabka Macluumaadka Waxbarashada La Maamulay (Managed Education Registry Information Tool, MERIT)?
- Waa maxay aqoonta waxbarashada shaqaalaha ee;
  - Hogaaminta Macalin? Kaaliyaha Macalin? Hawlwadeenka taageerada qoyska? Tababare?
- Qaababkee ayuu u taageeraa Lataliyaha Caafimaadka Maskaxda Caruurnimada Hore shaqadaada ECEAP?

## Qaybta ENV: Deegaanka

- Caafimaadka iyo Amaanka waxaa lagaga hadlayaa qaybtan heerarka. Maxaad ka qabanaysaa nidaamyada aad ku buuxinayso heerarka goobtaaga ama xaruntaada?
- Macluumaadka waalidka ee qorshaynta cuntada ayaa looga baahan yahay ECEAP. Waa maxay fikirka aad ka haysato sida loo uruuriyo macluumaadka qorshaynta cuntada ee qoysaska?
- Heerka - ENV-3 Nashqada Wadajirka Deegaanka (1,e) ee gobolka, "Iska ilaalinta saxmada, maaxinta yar, ama maaxinta badan." Sidee ayaad u heleysaa dheelitirka saxda ah ee u dhaxeeya inta aadka u badan iyo aadka u yar?

## Qaybta IC: Isdhaxgalka iyo Manhajka

- Maxay tahay in lagu daro qorshaha daryeelka shakhsi ahaaneed?
- Qaybtan, weedha "dhaqan ahaan la xidhiidha" waxaa loo adeegsadaa heerar badan. Maxay weedhu kaaga dhigan tahay adiga?
- ECEAP waxaa ka go'an inay ku hogaamiso sinaan qoomiyad oo ay mamnuucdo natiijada soo jireenka ah ee ardayda midabka ah. Yoolka ECEAP ee in aan heerka in aan la eryin waxa weeye in la xaqiijiyo caruurta iyo qoysaska in la siiyo khayraad iyo taageero diirada lagu saarayo khidadaha ilmaha. Sidee ayaad u xaqiijin kartaa in siyaasan loogu hogaansamo qandaraasle ama qandaraasle hoosaad ahaan?

## Qaybta PAO: Maamulka iyo Kormeerka Barnaamijka (Program Administration and Oversight)

- Waa maxay farqiga u dhaxeeya Heerka Kala Duwanaanshaha iyo Ka Tanaasulka?
- La shaqaynta bulshada ayaa qayb muhiim ah ka ah tayada sare ee barnaamijka waxbarashada dugsiga kahor. Sida ay yihiin heerar ku, hawlahee ayay tahay Qandaraasluhu inuu ka qayb geliyo cida bulshada lagala shaqayno?
- Maxay tahay in lagu daro nidaamkaaga u hogaansanka waalidka iyo bulshada?
- Sida uu dhigayo Heerka Waxqabadka ECEAP PDTR-10, u qalanka iyo qaadarashada shaqaalaha xaqiijiyay u qalanka ECEAP waa inay: Buuxiyaan tobobarka 2022 ee Dayrta ee Shaqaalaysiinta, U Qalanka iyo Qaadarashada Waaxda Caruurta, Dhaliyarta iyo Qoysaska (Department of Children Youth and Families, DCYF) ECEAP, si foolka-fool ah ama onleyn ah, oo ay haystaan shahaado dhamaystir.
  - Linkiga tobobarka <https://dcyftraining.com/>